Australian Government

COVID-19 VACCINATION

Waxa laga filan karo maalinta tallaalka COVID-19 ee xarunta lagu daryeelo dadka da'da ah ee deggan

Macluumaad loogu talagalay deganayaasha, qoysaska, daryeelayaasha iyo kuwa aad jeceshahay

Dowlada Australiya waxay leedahay istiraatiijiyad ay ku gaarsiinayso talaalada COVID-19 qofkasta oo ku nool Australiya.

Shaqaalaha daryeelka dadka da'da ah ee deegaan xarumaha iyo deggeneyaasha ayaa ka mid noqon doona dadka ugu horreeya ee dooran kara inay qataan tallaalka COVID-19. Tani waa qayb ka mid ah wajiga koowaad (Wajiga 1a) ee istaraatiijiyada lagu hergalinta qaran ee tallaalka 'COVID-19' ee Australiya.

Tallaalka COVID-19 ee loogu talogalay shaqaalaha daryeelka dadka da'da ah ee xarumaha iyo dadka deggan waxaa lagu sameyn doonaa xarumaha daryeelka dadka da'da ah ee ay deggan yihiin. Xarunta daryeelka dadka da'da ah ee deegaanka ah ayaa ku ogeysiin doonta goorta tallaalkaagu noqon doono.

Dhokumentigani wuxuu ku siinayaa adiga, qoyskaaga, daryeelayaashaada iyo dadka aad jeceshahay macluumaad ku saabsan waxa aad filan kartid inta u horraysa, iyo maalinta tallaalkaaga.

Kahor maalinta tallaalka

- Dowlada Australiya waxay abaabuli doontaa talaalada lageeyo xaruntaada lagu daryeelo dadka da'da ah.

- Dawlada Australiya waxay kaloo qortay shaqaale caafimaad oo soo booqan doona xarunta daryeelka dadka da'da ah ee ay deggen yihiin kana siin doona tallaalka dadka deegaanka iyo shaqaalaha. Shaqaalahan caafimaad waxay si dhow ula shaqeyn doonaan xaruntaada inta ka horeysa maalinta tallaalka si loo qorsheeyo loona hubiyo in maalinta tallaalku u socoto si badbaado leh oo waxtar leh.

- Xaruntaada lagu daryeelo dadka da'da ah ee deegaanka ah ayaa ku weydiin doonta adiga, iyo qofka badalkaaga go'aanka gaarikara (haddii mid jiro), inaad ogolaato qaadashada tallaalka COVID-19.

    - Macluumaad ayaa laga heli karaa si aad go'aan macquul ah uga gaartid tallaalka COVID-19. Haddii aanad xaruntaadu ku siinin macluumaadkan, waxaad ka heli kartaa nuqul websaydhka Wasaaradda Caafimaadka.

    - Kahor intaanad bixin oggolaanshaha, adiga, qoyskaaga, xannaaneeyayaashaada iyo go'aan qaadayaashu sidoo kale waxaad dooran kartaan inaad lashaqeysaan shaqaalaha caafimaadka ee xaruntaada, GP ama xirfadleyaasha kale ee caafimaadka si ay ugala hadlaan faa'iidooyinka iyo halista tallaalka, iyo inay kugu habboon tahay inaad qaadatid Talaalka covid19.

- Shaqaalaha caafimaadka ee xaruntaada ayaa hubin doona caafimaadkaaga si ay u hubiyaan inay kugu habboon tahay inaad qaadatid tallaalka. Haddii xaruntaadu wax walwal ah ka qabto caafimaadkaaga waxay la tashan doonaan GP. Waxa kale oo aad dooran kartaa inaad kala hadashid GP-gaaga wakhti kasta oo ku saabsan caafimaadkaaga iyo tallaalka COVID-19.

- Haddii aad ogolaatid inaad qaadatid tallaalka COVID-19 xaruntaada lagu daryeelo dadka da'da ah ayaa iska diiwaangelin doonta inaad heshid tallaalka. Xaruntaadu waxay ku maareyn doontaa dhammaan qabanqaabada maalinta tallaalka iyadoo la adeegsan doono xoogga tallaalka.

- Tallaalka COVID uma baahna inuu dhakhtarkaaga, GP, guud inuu kuu qoro.

- Waxaad xaq u leedahay inaad heshid u doodaha daryeelka dadka da'da ah. Adeegani oo loo maro OPAN waa mid bilaash ah, qarsoodi ah kana madax banaan dawladda iyo bixiyeyaasha daryeelka dadka da'da ah. U doodayaasha Daryeelka Dadka Da'da ah ee gobolkaaga ama taritorigaaga waxaa laga heli karaa 1800 700 600 ama opan.com.au.

Maalinta tallaalka

- Haddii aad doonaysid inaad qaadatid tallaalka, shaqaalaha rugta caafimaad ee xaruntaadu waxay hubin doonaan inaad caafimaad qabtid maalinta tallaalka. Haddii aad yeeladi arrin caafimaad daro ah maalinta tallaalka xaruntaada daryeelka dadka da'da ah ee la dagan yahey waxay la tashan kartaa GP si loo go'aamiyo in tallaalkaagu sii socon karo, ama haddii ay u baahan tahay in dib loo dhigo illaa waqti dambe.

- Waxaad dooran kartaa inuu kuu raaca xarunta daryeelka dadka da'da ah ee ay deegan yihiin maalinta tallaalka si uu kuu caawiyo oo kuu taageero. Tan waxaa ka mid noqon kara qof kuu turjuma macluumaadka ama ku siiya kalsooni haddii aad dareen dareentid.

- Sida tallaal kasta, waxaad yeelan kartaa xoogaa saameyn ah kadib markaad qaadatid tallaalka COVID-19. Macluumaadka ku saabsan waxa laga filan karo tallaalkaaga ka dib waxaa ku siin doona shaqaalaha rugta caafimaad ee ku tallaalays a tallaalkaaga. Macluumaadkan waxaa sidoo kale laga heli karaa websaydka Waaxda Caafimaadka.

- Talaalkaaga kadib, shaqaalaha xaruntaada lagu daryeelo dadka da'da ah ayaa si dhaw kugula socon doona. Haddii aad dareentid caafimaad qabin ka dib qaadashada tallaalkaaga hubi inaad u sheegtid iyaga.

La soco wixii macluumaad ah ee aad ku kalsoon tahay

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah, oo ay ku jiraan macluumaadka la turjumay ee Waaxda Caafimaadka Websaytka tallaalka COVID-19. Waxaad sidoo kale isdiiwaangalin kartaa si aad uheshid wararka cusub ee tallaalada COVID-19.

Waxaad sidoo wici kartaa Khadka Caawinta Qaranka ee Coronavirus (National Coronavirus Helpline) 1800 020 080, oo weydii turjubaan haddii loo baahdo.

Shabakadda u doodda dadka waayeelka ah (OPAN) ayaa la heli karaa haddii aad dooneysid inaad ka hadashid wixii arrimo ah ama walaac aad ka qabtid arrimaha la xidhiidha COVID-19 ama haddii aad u baahan tahay caawimaad ka qayb qaadashada daryeelkaaga da'da ah bixiye. Wac 1800 237 981, 6 am-10pm (AEDT), 7 maalmood usbuucii ama emayl u dir covid@opan.com.au.